Barnaamijka Tallaalka ee Human Papillomavirus (HPV) ee Gabdhaha Fasalka 8-aad Dhigta: **Waxyaabaha loo baahan yahay in aad ogaato**

Waa Maxay Human Papillomavirus (HPV)?

HPV waa fayrus caadi ah oo 100 noocyo kala duwan leh. HPV-ga qaarkiisa waxaa uu keenaa kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka haweenka. HPV-ga badankiisa tallaal ayaa looga hortagi karaa.

Sidee la isaga qaadaa HPV-ga?

HPV-ga waxaa caadi ahaan lagu kala qaadaa marka la isu galmoodo oo ay is taabtaan maqaarka qofka qaba iyo qofka kale.

Waa maxay calaamadaha HPV-ga?

Dadka badankiisa wax calaamad ah ma ay isku arkaan mana ogsoona in ay qabaan HPV waxaana ay sidanayaan fayruska iyagoo dad kalena qabadsiin kara. Iyadoo ay ku xiran tahay nooca HPV-ga, qofka qaba waxaa ku dhici kara afka ilmo-galeenka oo aan caadi ahayn, kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka, kansarada kale ee xubnaha dhalmada gala ama feexda xubnaha dhalmada ka soo baxda.

Maxaa dhici kara haddii aad qaadid HPV-ga?

Dadka weyn ee Canada ku nool badankooda waxaa mar uun noloshooda ku dhici doona HPV-ga. Hab difaaca jidhka ayaa caadi ahaan iskiisa isaga difaaca fayruska. Dadka qaarkiisa, fayruska waxaa uu keeni karaa kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka. Waxaa jira 500 haween ah oo la ogaaday in ay qabaan kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka kaasoo keena 140 dhimasho sanad walba Ontario gudaheeda.

Sideen Ilmahayga uga caawini karaa in ay ka badbaadaan HPV-ga?

Tallaal ilmahaaga. Tallaalka waxaa uu ka hortagi karaa afar nooc – nooca 6, 11, 16, iyo 18.Canada gudaheeda, nooca 16 iyo 18 waxay keenaan 70% kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka. Nooca 6 iyo 11 waxay keenaan 90% feexda xubnaha dhalmada ka soo baxda.

Sidee loo qaataa tallaalka HPV-ga?

Tallaalka waa irbad gacanta la isaga duro. Seddex qaybood oo ah tallaalka HPV-ga ayaa loo baahan yahay si looga badbaado. Seddex qaybood oo tallaalka ah ayaa la bixiyaa sanad dugsiyeedka gudihiisa. Caadi ahaan, qaybta labaad waxaa la bixiyaa 2 bilood kaddib qaybta hore iyadoo qaybta seddexaad la bixiyo 6 bilood kaddib qaybta hore.

Cidma ayeey tahay in laga tallaalo HPV-ga?

Tallaalka HPV-ga waxaa loo oggolaaday gabdhaha ay da'doodu u dhaxeyso 9 illaa 26. Waxaa uu waxtar fiican leeyahay marka la qaato inta aysan billaabin galmada. Maamulka gobolka waxaa uu bixinayaa tallaalka HPV-ga oo aan kharash ugu fadhinin dhammaan gabdhaha dhigta Fasalka 8-aad iyadoo lagu qaybinaayo bukaan socod eegtooyinka dugsiga.

Cidma ayeey tahay in aan laga tallaalin HPV-ga?

Ma aha in ilmahaaga laga tallaalo HPV-ga haddii:

- hore looga wada tallaalay HPV-ga;
- ay xasaasiyad daran ka qaaday tallal hore oo HPV-ga ah;
- ay xasaasiyad u leedahay khamiirka ama nooc ka mid ah tallaalka; iyo
- ay uur leedahay.

Ma loogu talagalin in la tallaalo haddii ay qabto xumad ama wax kasta oo ka yar hargabka fudud.

Samoli Catalogue CIB-7610-6151882 200M Sept/07 © Queen's Printer for Ontario

Ontario

Miyeey jiraan waxyaabo uu tallaalka keenaayo?

Tallaalka HPV-ga waa mid badbaado leh oo la oggolaaday in Canada gudaheeda loo isticmaalo gabdha ay da'doodu u dhaxeyso 9 illaa 26 sano. HPV-ga waxaa uu qabaa waxyeellada la mid ah noocyada kale ee tallaalada.Waxyeelladu waxaa ka mid ah goobta tallaalka oo noqota guduud, jileec oo bararta iyo, xummad, lablabo, dawakhsanaan iyo madax xanuun. Waxyeellada ugu yar ee ay keento 15-ka maalmood ee tallaalka gudihiisa waa in dhakhatarka ama qaybta caafimaadka xaafadda la soo ogeysiiyaa. Waxyeellada waxaa ka mid ah neefta oo cuslaata, barar gala wajiga ama afka, xummad ka badan 39˚C, iyo firiiric. Kalkaaliyeyaasha caafimaadka ayaa tallaalka bixiya waxaana ay marwalba joogaan bukaan socod eegtooyinka dugsiga. Waxaa loo tababaray in wax ka qabtaan waxyeellada daran.

Waa sidee waxtarka tallaalka?

Tallaalku waxtarkiisu waa 100% marka ay noqoto noocyada HPV-ga HPV ee uu tallaalka kaa badbaadinaayo. Daraasadaha waxay muujinayaan in ay waxtarkoodu soconayso muddo shan sanadood ah. Ma jiro khatar la xiriirta qaadista HPV-ga oo tallaalka laga qaado, maadaama tallaalku uusan lahayn fayruska nool.

Waxyaabo kale oo muhiim ah ee ku saabsan tallaalka HPV-ga.
Inkastoo tallaalka aad looga badbaado HPV-ga, balse ma uu beddelaayo baaritaanka kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka. Baaritaanka caadiga ah ee kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka ayaa ah sida ugu fiican ee looga badbaado. Tallaal dheeraad ah ee lagu xoojinayo kii hore ayeey tahay in xilli dambe nolosha la qaato. Tallaalka haatan ma loogu talagalin ragga.

Haddii ilmuhu aysan ku jirin fasalka 8-aad miyaa laga tallaali karaa?

Maamulka gobolka waxaa uu bixinayaa tallaalka HPV-ga oo aan kharash ugu fadhinin dhammaan gabdhaha dhigta Fasalka 8-aad iyadoo lagu qaybinaayo bukaan socod eegtooyinka dugsiga. Dhammaan gabdhaha ay da'doodu u dhaxeyso 9 illaa 26 waxay arki karaan dhakhtarkooda si loo tallaalo. Seddexda qaybood waxay qiyaastii joogaan $400.

Inta aan la bixin tallaalka HPV-ga, kalkaaliyeyaasha caafimaadka dadweynaha waxay ilmaha waydiiyaan su'aalo ku saabsan:

- caafimaadka ilmaha ee maalintaasi;
- caafimaadka guud ee ilmaha;
- haddii ay aleerjiyo u leeyihiin tallaalka iyo dawooyinka qaarkooda;
- haddii ay jiraan dawooyin ay ilmahaagu qaataan;
- haddii ay hore ujireen wax dhibaato ah ee ku saabsan helitaanka tallaalka; iyo
- haddii uu jiro tallaal hore oo HPV ah.

Maalintaasi ilmahaaga waa la tallaalayaa:

- ilmahaaga ha soo xirtaan shaar gacmo gaaban si uu tallaalku u fududaado; iyo
- ilmahaaga ha soo cunaan quraa ama qado fiican it aaysan imaan bukaan socod eegtada.

Haddii ilmahaaga hore looga tallaalay HPV-ga, fadlan waxaad soo wacdaa Qaybta Caafimaadka Dadweynaha si loo casriyeeyo galka ilmahaaga ama si aad u buuxisid foomka oggolaashada.

Miyaad doonaysaa in aad wax dheeraad ah ka ogaatid?

Si aad macluumaad dheeraad ah u heshid:

- Waxaad soo wacdaa INFOline 1-866-559-4598 (TTY 1-800-387-5559)
- Waxaad booqataa www.hpvontario.ca
- Waxaad la xiriirtaa Qaybta Caafimaadka Dadweyanah

Ontario